

Daryeelka Ilmaha iyo

Caafimaadka Ilmaha

XAASHIDA MACLUUMAADKA WAALIDKA



Barida carruurta dhaqanka dadka Aborijiniska ah

Waxyaallaha soo socdaa waa bilawga xarakaad aragtiyeed iyo macluumaad bixinaya waaya-aragnimo xiiso leh, xasaasi ah oo wax ku oolla kaas oo kor u qaadaya la socodka hidaha Aborijiniska iyo dhaqankooda.

Buugaagta iyo Sheekaynta

U akhri ilmaha yar sheekooyinka dadka Aborijiniska ah. Marka lagu daro sheekooyin badan oo dhaqameed oo ku salaysan Riyada Aborijiniska, waxaa jira sheekooyin badan oo casri ah oo ku saabsan dadka Aborijiniska ah.

Carruurta waa jeceshahay sheekaynta waxayna qayb weyn ka tahay dhaqanka dadka Aborijiniska ah. Isku day akhrinta iyo barashada sheekada dhaqameed ee Riyada Aborijiniska uguna celi sheekada ilmahaaga adiga oo aan ka akhriyayn buugga. Dhaqan ahaan sheekada waxaa lagu sheegaa xayndaanka dabka habeenimada, sidaas darteed maxaad ula fariisan weyday carruurta xayndaanka ciidda si aad ugu celiso sheekada, adigoo isticmaalaya ul aad ku sawirayso humaag ciida dusheeda. Ku dhiiri geli carruurta inay xiraan indhahooda ayna dhegaystaan sheekada adeegsadaan malahooda si ay ugu sameeyaan muuqaal maskaxdooda.

Muyuusig

Cayaar muyuusiga Aborijiniska, didgeridoo ama aallad kale oo si gaaban loo maqlayo marka carruurta wax cunayaan, nasanayaan ama gudaha ama banaanka ku cayaarayaan. Cayaar heesaha iyo muyuusiga dhaqameed ee casriga ah oo dadka Aborijiniska.

Xuja-samayn

Xujooyin badan ayaa muujiya kala duwanaanshaha dadka Aborijiniska ah iyo hanaanka nololeed oo hadda jira. Sawirada iyo midabada la isticmaalo ayaa kala duwan waxayna carruurta siiyaan fursada lagu siyaadiyo ogaanshahooda kala duwanaanshaha dadka Aborijiniska ah.

Farshaxan/sawir gacmeed

Ka samay xarig lagu qabto gorayada (waxaa laga hellaa dukaamada qalabka iibsha) kaas oo ranji lagu qurxiyey. Gorayo wacuhu wuxuu la mid yahay didgeridoo (kaas oo dhaqan ahaan ay isticmaalaan ragga keligood), laakiin aad u gaaban – qiyaas ahaana dhererkiisu dhan yahay 40cm waxaana loo isticmaalaa ugaarsiga. Gorayo wacaha hal dhinac waxaa gacanta dhinaca kalena waxaa lagu tuuraa gacanta kale. Waxaana loogu yeeraa 'gorayo wece' sababtoo ah codku wuxuu la mid yahay midka gorayada. Ugaarsadayaashu waxay u isticmaali jireen gorayada. Gorayadu aad ayey u dani badan tahay, waxayna raadisaa jabaqda. Marka gorayadu aad u dhowdahay, ugaartaha ayaa ku tuuray si uu u qabto.

Hab dhaqameed kale oo ugaarsadayaashu ay isku dayeen inay ku qabtaan gorayada waa in loo dhexgalo cawska waxaana la ruxaa lugaha iyo gacmaha. Daniga badan dartiis gorayadu way ku soo orodaa si ay u aragto waxa socda ka dibna waa halgaadayaa. Isku day inaad carruurta sidaan la samayso – waa wax aad u xiisa badan.

Waxyaalla kale oo xiisa lihi waa isku garaacida qoryaha – oo iyadana loo yaqaan durbaamin, ama isku garaacida qoryaha muyuusiga. Dhaqan ahaan waxay ka samaysan yihiin alwaax waxaana lagu qurxiyaa ranjiyeyn ama waxa lagu astaamiyaa silig guban. Qoryuhu noocyo kala duwan ayey ku yimaadaan waxaana loogu talagalay inay isticmaali karaan ragga iyo dumarkuba. Laba qori ayaa la isku dhiftaa si ay dhawaaq u sameeyaan. Isku garaacida qoryaha waxaa lagu sameeyaa xarig kaas oo laga soo gadan karo dukaamada qalabada lagu iibiyo inta la rabo. Marka carruurta ranjiyeyso oo ay qurxiyaan, diyaar ayay u yihiin in joogto loo isticmaalo.

[Xaashidaan waalidka ee xaqiiqada waxaa la hellaa iyada oo ku qoran dhowr luqadood waxaana lagala soo bixi karaa Early Childhood Connections websatalkooda oo ah www.econnections.com.au](http://www.econnections.com.au)

DA'DAALKA



ROYAL CHILDREN'S HOSPITAL

WAXAA TAAGEERAY DEEQDA
WAXBARASHADA KA TIMID



WAXAA KAALMEEYEEY GOLAHA
AQOONSIGA DARYEELKA
ILMAHA EE QARANKA



WAXAA TAAGEERAY



Australian Government
Department of Families,
Community Services and
Indigenous Affairs